

Meey 1, 2020

Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiyada Dadweynaha Boston,

Waxaan rajeynayaa in adiga iyo kuwa aad jeceshahayba ay nabad iyo caafimaad qabtaan.

Tan iyo markii uu gudoomiye Baker shaaca ka qaaday in dhamaan dugsiyada Massachusetts ay sii xirnaan doonaan ilaa sanadkaan tacliinta sare, Waaxda Massachusetts ee Dugsiga Hoose iyo Dugsiga Sare Jeffrey Riley ayaa dhawaan siisay hagitaan dugsiyada, isagoo hoosta ka xariiqay in waxbarashadda ardaydu ay sii socon doonto, iyada oo ahmiyadda koowaad la siinayo caafimaadka iyo nabadgelyada. Waan fahamsanahay in tani ay inoo tahay waqti adag oo aan dhamaanteena ku wada jirno maadaama aan isku dheelitirno shaqada, nololsha guriga, daryeelayno kuwa aad jeceshahay, iyo waxbarashada carruurteenna iyada oo aan sidoo kale ka shaqeyneyno sidii aan amaan u ahaan lahayn inta lagu jiro xiisaddan caafimaad.

Waxaan ogsoonahay in ardayda ay ka maqan yihiin asxaabtooda fasalka, macallimiintooda, iyo dhacdooyin tiro badan oo macno leh. Waan xiiseynaynaa sidoo kale. In kasta oo aan dib udajin karin khibrada fasalka oo dhan inta lagu gudajiro dugsiyada, waxaan ku siin karnaa fursado waxbarasho kobcinaya iyo isku xirka ardaydeena.

Waxaan diyaar u nahay inaan la kulano baahida gaarka ah ee ardaydeena si aan u sii wadno waxbarashadooda oo aan u siino taageerada qoysaskayaga. Kooxdeenu waxay si aad ah ugu hawlanaayeen sidii ay u soo saari lahaayeen qorshayaal ayna ula shaqeyn lahaayeen hogaamiyaasha iskuulada si loo hubiyo in ardayda ay fursad u helaan fursadaha waxbarasho inta ka harsan sanad dugsiyeedkan.

Waxyaabaha soo socdaa waxay dhaqan galayaan Isniinta, Meey 4-teeda ilaa dhamaadka sanad dugsiyeedka bisha Juun.

Jadwal: Dugsi kastaa wuxuu la wadaagi doonaa jadwal fasal qoysaska iyo ardayda.

Imaanshaha: Macallimiintu waxay qori doonaan imaanshaha maalin kasta usbuuc kasta. Imaanshaha waxaa ka mid ah dhammaystirka howlaha waxbarashada ama is-dhexgalka macallimiinta / shaqaalaha. Macallimiinta fasalada K0-5 ayaa duubi doona maalin kasta. Macallimiinta fasalada 6-12 waxay duubi doonaan ka xaadiritaanka maalin kasta koorso ahaan.

Darajo-bixinta: Ardaydu waxay heli doonaan darajooyin iyo ra'yi-bixin ku saabsan mashruucyada loo xilsaaray iyo howlaha ay qabteen. Ardayda dugsiga hoose (fasalada K0-5) waxay helayaan muddo ah 3 fasal oo ah Buuxiyo Waxyaabaha laga filayo, Rajada laga filayo, ama aan weli la fileynin in kulannada laga filayo. Ardayda dugsiga sare (fasalada 6 -12-aad) waxay heli doonaan darajo Muddo 3-geesood ah haddii ay ka sareeyaan celceliskooda fasalada 1aad iyo 2aad. Haddii kale, ardayda dugsiga sare waxay kasban doonaan darajo ah Pass ama Dhammaystirna darajadaas looma gudbin doono darajada ugu dambeeyso.

U sii gudbinta Fasalka Xiga: Majiro arday loo qaban doono darajadooda. Dhammaan ardayda waxay u gudbi doonaan fasalka xiga waxayna heli doonaan fursado barashada xagaaga iyo

taageero dheeri ah xilliga dayrta. Haddii waaliddiintu ay aaminsan yihiin in ubadkoodu ka faa'iideysan lahaa ku-celinta darajadooda, waxay codsan karaan kulan ay la yeeshaan macallinkooda.

Gaaritaanka barayaasha: Jadwal dugsiyeed kasta waxaa lagu dari doonaa waqtiyada fasalka, iyo xubin ka mid ah shaqaalaha dugsi ayaa la xiriiri doona arday kasta ugu yaraan saddexdii maalmoodba.

Ardayda Naafada ah: Ardayda ayaa heli doona adeegyo macquul ah oo lagu bixin karo jawi waxbarasho fog oo ay u xilsaareen kooxdooda barayaasha ee la xariirta himilooyinka lagu cadeeyay IEP ardayga.

Bartayaasha Ingiriisiga: Ardaydu waxay heli doonaan tilmaamaha ESL ku saleysan Heerkooda Horumarinta Ingiriisiga.

Qalin jabin: Qalin jabinta waa dabaaldega ardayda, qoysaskooda, iyo bulshooyinka iskuulkooda. Waxaan ka shaqeyneynaa dhowr fursadood oo aan ugu dabaaldegnno qalin jabinta sannadkan magaalada oo dhan iyo dugsi kasta. Waxaan rajeyneynaa inaan la wadaagno macluumaad dheeri ah.

Waan sii wadi doonnaa inaan qiimeyno oo aan beddelno sida aan ula kulanno baahida ardayda inta lagu jiro xiritaankan aan horay loo arag ee ku saleysan jawaab-celinta. Aniga iyo kooxdeydaba waxaan qabanay isbuucyo Shir Sinaan si aan uga maqalno barayaasha, waalidiinta, bixiyeyaasha adeegga bulshada, iyo la-hawlgalayaasha bulshada si aan u ururinno jawaab celin dhab ah oo aan u aqoonsanno caqabadaha si aan u tilmaano kheyraadka aan ku taageerno ardayda iyo qoysaska u baahan.

Waxaan aad ugu mahadnaqaynaa macallimiinteena, shaqaalaha cuntada, shaqaalaha teknolojiyada, iyo shaqaalaha kale ee safka hore uga shaqeeya oon ka daalin si ay u helaan carruurteenna waxay u baahan yihiin inay bartaan oo ay caafimaad qabaan. Waxaan si qoto dheer u daryeeleynaa ardaydeena iyo qoysaskeena waxaana rajeyneynaa inaan sii wadno dhisida xiriirro macno leh dhammaantiin maadaama aan xirno sannad dugsiyeedkeena dhowrka toddobaad ee soo socda. Haddii aad wax su'aalo ah ka qabtid macluumaadkan fadlan la xiriiri maamulaha dugsiigaaga.

Fadlan sii wad inaad ku celceliso kafogaanshaha bulshada, xiro wejiga daboolka marka ay tahay inaad ka baxdo guriga, oo aad gacmahaaga dhaqdo marrar badan. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ilaha cuntada, tikniyoolajiyadda, wax ku barashada guriga, iyo waxyaabo intaa ka sii badan ee bostonpublicschools.org/coronavirus

Waan hubaa inaan sii xoogeysan doono oo keliya oo aan sii fiicnaan doonno maalin kasta. Waxaan halkaan u joognaa inaan ku taageerno si bulsho ahaan ah.

Caafimaad qab iyo nabadgelyo.



Brenda Cassellius
Kormeeraha guud

